


# Waxtarka Carrabka iyo Dibnaha iyo Sababta uu Eebbe innoogu manna sheegtay \*

W/Q Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo'

[herer\\_09@yahoo.com](mailto:herer_09@yahoo.com)



*Suuradda 90aad ee Quraanka, Al-Balad*

## 1. Hordhac:

Xubnaha afka dadku way farabadan yihiin. Hawlo kala duwanna way fuliyaan. Xubnaha ugu taabbudsanna waxa ka mid ah dibnaha iyo carrabka. Noole farabadan baana midhkaa dadka la wadaaga sida duunyada iyo dugaagga. Qaarkood dadka ka carrab iyo dibnaba waaweyn. Hayeeshee, Eebbe dadka oo qudha ayuu ugu manna sheegtay sida ku cad Aayadda 9aad ee Suurat

---

\*Qoraalkani wuxu markii u horreysey ku soobaxay warsidaha Herer, xidhmadiisii 1aad tirsigiisii 1aad ee maarij 2012

Al-Balad ee Quraanka ee kor ku xusan. Waxa haddaba isweydiin leh sababta uu Weynuhu dadka ugu manna sheegtay. Si aan haddaba arrintaa uga baaraan degno waxa lagama maarmaan ah inaan si qoto dheeriya uga hadalno hawlaha ay dibnaha iyo carrabku dadka u qabtaan iyo waxa ay kaga duwan yihiin kuwa xoolaha ama dugaagga. Intaan arrintaa wax ka odhan bal aan marka hore wax yar ka idhaahdo sida ay Sheekhyada qaar u qeexaan Aayaddaasi.

a. Kitaabka Quraanka ee ujeeddadiisa lagu hal-tebiyey af Ingiriisiga waxa Aayaddaasi loo qeexay sidan hoos ku xusan:

<p>8. Have We not made for him two eyes,</p> <p>9. And a tongue and two lips?</p> <p>10. And shown him the two ways (good and evil)?</p>	<p>أَلَمْ جَعَلْنَا لَهُ عَيْنَيْنِ ﴿٨﴾</p> <p>وَلِسَانًا وَشَفَتَيْنِ ﴿٩﴾</p> <p>وَعَدَّتَيْنِ الْجَنَّتَيْنِ ﴿١٠﴾</p>
--	---

b. Kitaabka Quraanka ee ujeeddadiisa lagu qeexay af Carabiga waxa isna Aayaddaasi loo qeexay sidan soo socota:

أَلَمْ جَعَلْنَا لَهُ عَيْنَيْنِ ﴿٨﴾  
 ولسانًا وشفتين ﴿٩﴾  
 وعدتین الجنّین ﴿١٠﴾

٨- ﴿ أَلَمْ جَعَلْنَا لَهُ عَيْنَيْنِ ﴾ ، أَيْ جَعَلْنَا لَهُ عَيْنَيْنِ ﴿ ٩ ﴾ . ﴿ ولسانًا وشفتين ﴾ . ١٠- ﴿ وعدتین الجنّین ﴾

c. Kitaabka Quraanka ee ujeeddadiisa lagu hal-tebiyey af Soomaaligana waxa isna Aayaddaasi loo qeexay sidan hoos ku xusan:

8. Miyaannaan u yeelin Laba ind-  
hood.

الرَّجُلُ الْمُرْتَدُّ

9. Iyo Carrab iyo Laba bishimood.

وَلِسَانًا وَشَفْتَيْنِ


10. Oo miyaannaan u caddaynin La-  
bada Jid (khayrka iyo sharka).

وَهَدْيَتَهُ الْجَدِيدِ

Magaalada Maka yuu Eebe ku dhaartay, maxaayeelay waa Magaalo barakaysan Quraankana lagu soo dajiyay, Nabigana laga bixiyay, Kacbaduna ku taallo, Saas darteed waa in la wayneeyo, Addunkuna waa halgan iyo dhub, waase in xaqa la raacaa loona adkaayaa bixinta xooluhuna waa inay ahaataa dar Eebe, maxaayeelay? Eebe wuxuu inagu galladaystay nicmooyin badan, sida: Indhaha, Caqliga, Afka, Carrab-

Saddexda kitaaba si isku mid ah baa loo qeexay Aayadda. Waxayna ku salaysan tahay ujeeddada guud. Taasi oo aan wax badan ka sheegaynin taabbudnimada ku duugan. Si aan u muujinno murtida ku duugan Aayaddaasi waxan si faahfaahsan u eegi hawlaha iyo waxtarka dibnaha iyo carrabkaba.

## 2. **Dibnaha** (Bushimaha):



**Dibno**

Aan ku bilaabee dibnuhu sida ku qeexan abwaanka Yaasiin Keenadiid (1976), waa labada cad ee ilkaha iyo cirridka korkooda ku yaal ee kolkii laysku qabto afka daboola.

Erayo badan baana dibnaha la'aantood aan afafka ku jireen. Dibnuhu kolka ay dib u faydmaan, ilkuhuna aanay muuqan Soomaalidu waxay u taqaan *muusood*. Haddii ay ilkuhu wax yar muuqdaanna waa *dhool-bidhin*. *Ilka caddayntuna* waa kolka ay foolashu wada muuqdaan.

Waxyaalo kale ayay dibnuhu hal-beeg u yihiin. Dibnaha oo la furiwaayaa waa aammusnaan. Hadal yari iyo dhawrsanaan baanay tilmaan u yihiin. Haddii la buurana cadho ayay astaan u noqdaan. Maahmaah Soomaaliyeed baana tidhaa: gafuur cadho nn leh buu ku yaal. Dibinta hoose oo qudha kolka la qaniino

qamuunyaa la dhahaa. Ciil iyo calool xumo raagtay baanay astaan u tahay. Hawlaha ay dibnuhu qabtaanna waxa ka mid ah:

- 2.1. **Nuugista:** Dibnaha la'aantood ilmo yari ma noolaadeen haddii aanu hooyo naaskeeda caano ka nuugin. Qof harraad hayaa moqor biyo kama cabbeen. Shaah kulul lama firiqsadeen, dabna inta dunculaal la saaro oo la afufo lama belbeliyeen. Taabbudnimada dibnaha waxan ka heleynaa sheeko-dhaqameedka Soomaalida. Sheekada dhurwaagii norigta yar labada faruuryood ka goostay hooyadeedna candhada ka cunay baa laga hayaa inuu yidhi: Maxay ku nuugtaa ama ka nuugtaa?
- 2.2. **Dahaadh:** Dibnuhu waxay dabool u yihiin afka. La'aantood cayayaan kastaa waa innaga gelilahaa, dhareerkuna waa innaga quban lahaa.
- 2.3. **Quruxda:** Quruxda dadka qayb weyn bay dibnuhu ka qaataan. Qof qof la dibno ihina ma jiro. Taasina waa ta keentay in sida faraha ay denbi baadhayaashu dibnahana u adeegsadaan agab lagu caddayn karo gaboodfal lagu kacay haddii la helo weel uu gabood fale wax ku cabbay. Dhaqankeenna dibnaha waaweyn iyo kuwa yaryarba loo ma arko qurux. Hayeeshee, kuwa buuxa ee madmadow inanta leh waxa loo arkaa inay dumar wax dheertahay. Inan ragna wuxu u tartamaa sidii uu inantaa u taabilahaa. Maansooyin badan baana tilmaama aragtida Soomaalida ee dhanka dibnaha waxana ka mid ah:

*Dibnaheeda dugulka ah*

*Nimaad qali qamuunyada ka dhawr, foolashana u qaawi*

*Nin ilko dheeri hadduu dhintana inuu qoslayaa la moodaa*

**2.4. Dhunkashada:** Dibnaha la'aantood erayguba ma jireen. Waxana lagu muujiyaa dareen hoosaad Soomaalidu u taqaan kal-gacal. Laba qof oo is dhalay haddii ay kala dhoo-fayaan way isa sii sagootiyaan. Dareenkoodana waxay ku muujiyaan dhunkasho.

Ayaga oo kala baaday haddii ay isu soo noqdaan ama meel ku kulmaan xiisahooda waxay ku caddeeyaan dhunkasho. Dad badan oo daltabyooday baa markay dalkooda ku noqdaan kalgacalka iyo xiisaha ay ciiddooda u qabaan ku muujiyada dhulka oo ay dhunkadaan.



Hooyo ilmaheeda dhunkanaysa

Kitaabka Quraanka ayay dad badan oo Muslin ihi dhunkadaan, taasi oo tilmaan u ah kalgacalka loo qabo hadalka Eebbe.

**2.5. Foodhida** (foorida):


Dadka mooyee duunyadu ma foodhido. Waxaanay foodhidu ka mid tahay hawlaha ay dibnuhu inoo qabtaan. Sida laga wada warqabo foodhidu qayb weyn bay ku leedahay maaweelada, madaddaalada iyo xidhiidhka. Geeljire kolka uu geel carraabinayo ama adhijirtu ay adhi mayracayso foodhiday isku maaweeliyaan. Dhawrsiyooob baana loo foodhyaa. Waxana ka mid ah foodhigaallada. Qof kaa durugsan foodhi uun baa kuu soo jedin karta. Hadda oo la magaaloobay, muusigga ayay qayb weyn ka qaadataa.

Hawlaha dibnuhu qabtaan waxa ka mid ah kaalinta ay hadalka ku leeyihiin. Tusaale ahaan samaynta xarfaha qaar.

**2.6. Xarfaha ay labada dibnood wada sameeyaan** (Bilabials):

Kolka ay carruurtu hadal baranayso labada dhawaaq ee ay ugu horbartaan waa labada xaraf ee ‘b’ iyo ‘m’. Waxana la yidhaa ‘Bilabials.


Labadaa xaraf waxay ku jiraan erayo farabadan. Qaar way u horreeyaan sida Marwo, mataan, ballan, iyo baabuur. Qaar bay dhexda ugaga jiraan sida lammaan, hamuum, laba, iyo soobax, iwm. Qaar kalana way ugu dambeeyaan sida laab, roob, ham, iwm.



Afka Ingiriiska xarfaka ‘p’ ayaa ka mid ah xarfaha ay labada dibnood sameeyaan sida ‘people’, ‘pen’, iwm.

Dibnaha iyo carrabka la’aantood, xarfaha ‘w’, ‘o’, ‘oo’ iyo ‘u’ ama ‘uu’ may samaysmeen. Erayada xarfahaasi u horreeyaan waxa ka mid ah: war, wegen, woqooyi, waayeel, ood, olol, or, ubad, ugbaad, iyo uub iwm. Kuwa ay dhexda kaga jiraanna waxa ka mid ah: hawl, mawliid, qorrog, bottor, food, hub, lug, huur, iwm. Erayada qaar baa xarfahan ku dhammaada sida: law, farlaw, saw, aabbo, fardo, hunnuuhunnuu, iwm.

## 2.7. Xarfaha ay dibnaha iyo ilkuhu wada sameeyaan (Labio-dentals)




Waxa kale oo jira xarafyo ay dibnaha iyo ilkuhu wada sameeyaan. Tusaale ahaan kolka ay dibinta hoose iyo ilkaha sare is qabsadaan waxa samaysma xarfaka ‘f’ ee af Soomaaliga iyo ka kale ee

‘v’ ee ku jira afka Ingiriiska. Waxana loo yaqaan **labiodentals**.

## 2.8 Cudurrada dibnaha ku dhaca iyo iimahooda:

Sida waaxyaha iyo xubnaha jidhka ayay dibnahana ugu dhacaan cudurro. Dibin dillaaca, iyo barraqada ayaa ka mid ah xanuunnada dibnaha ku dhaca. Waxa jirta qaab darro dibnaha ku dhacda oo ay dadka qaar ku dhashaan, taasi oo loo yaqaan *faruur*.



Dadka faruurani erayo badan oo ay ku jiraan xarfihi aynu soo sheegnay ee aynu nidhi waxa sameeya dibnaha ma karaan ama si qumman uguma dhawaaqaan. Labkii iintaa ku dhasha faruur baa lagu naanaysaa, dheddiggana faruuro.

Dibinta hoose ee sida awrka hoos ku sawiran hoos u laallaadda waxa la yidhaa *dacay*. Haddii halka ay gadhka iyo dibintu iska galaan hoos u riixantahay *qabbin* baa la yidhaa.




Dibnaha xoolaha waxa la yidhaa faruuryo. Noloshoodana kaalin weyn bay kaga jiraan. Sida kuwa dadka ayay cunidda iyo cabbiddaba uga kaaliyaan. Faruuryaha la'aantood ri'yuhu geed may saaloosheen. Geeluna laan geed dheer ku taal muu laaceen.

Siday doontaba ha ahaatee, geelu dibnahaasi uma adeegsado, dareemo gaar ah sida qosolka, kal-gacalka, cadhada iyo dhool-bidhinta. Geel foodhyayana cid aragtay lama hayo. Ayagoo isu qoslayana lama arag.

### 3. Carrabka:

Erayga 'Lisaan' af Carbeedka laba ujeeddo ayuu ku leeyahay. Ujeeddada hore waa Carrab. Midda labaadina waa af. Ujeeddo kastaana taabbudnimadeeda ayay leedahay. Sidaasi awgeed bal aan ku bilawno carrabka iyo hawl qabadkiisa:




Carrabku wuxu isna ka mid yahay xubnaha ugu hawsha badan xubnaha afka. Wuxuna ka samaysan yahay muruqyo u hawl yareeya dhaqdhaqaaqiisa kolka la hadlayo iyo kolka wax la cunayaba. Hawlaha uu qabtana waxa ka mid ah:

#### 3.1. Calalinta:

Carrabku kaalin weyn buu ka qaataa calalinta cuntada. Kolka ay ilkuhu cuntada raaminayaan carrabkuna wuu rogrogaa, si intaan la liqin ay cuntadu u jilicdo. Wixii cunto ah ee ku hadha afka guduhiisa ama ku dhega ilkahana wuu ururiyaa.

#### 3.2. Dhandhanka:




Hawsha uu carrabku qabto waxa ka mid ah jaadadka dhandhanka oo lagu kala ogaado. Waxana ka mid ah jaadadka dhandhanka la yaqaan sida sawirka ku cad: qadhaadhka, dhanaanka, macaanka, iyo dhandhanka cusbada.

Dhandhanka caanaha xooluhu dhawr heer bay kala leeyihiin, kuwaas oo kala ah: dhay, il-qaad, jinaw, mayac, may dhanaan (suusac), karuur, kalbaa iyo yilix.




#### 4. Carrabka iyo afka:

Afafka qaar buu erayga carrab la mid yahay af sida af Carabiga iyo af Ingiriisiga. Taasina waa ta keentay inay dadka afka Ingiriiska ku hadlaa afka hooyo ugu yeedhaan ‘*mother tongue*’. Af Carabigana waxa loo yaqaan ‘*Lisaanun Carabiyi*’. لسان عربي



Xeel-dheerayaasha codaynta afafku carrabka ayay ku halbeegaan sida ay dhawaaqyada afku u samaysmaan. Tusaale ahaan, kolka carrabka caaradiisu taabato ilkaha sare waxa samaysma xarafyada kala ah ‘t’, ‘d’, waxana la yidhaa **dental**.




Kolka ay caarada carrabku kala dhexgasho ilkaha sare iyo kuwa hoose waxa samaysma dhawaaqa ‘θ’ ee ku jira erayga ‘*think*’ iyo ‘ð’ ee ku jira erayga ‘*then*’ waxana loo yaqaan **inter-dentals**.

Kolka uu carrabku taabto dhanxanagga hortiisa iyo ilkaha guntooda waxa samaysma xarafa kala ah ‘t, d, n, l, s, z’. Waxana loo yaqaan **alveolar**.





Kolka uu carrabka afkiisu taabto dhan-xanagga intiisa dambe waxa samaysma xarfaha kala ah ‘sh, ch, j, iyo r’. Waxana loo yaqaan **post-alveolar**.

Kolka uu carrabka dhexdiisu cadaadiso dhanxangga waxa samaysma xarafka 'y'. Waxana loo yaqaan **palatal**.



Kolka ay carrabka guntiisu cadaadiso dhanxanagga qaybtiisa dambe ee jilicsan waxa samaysma xarfaha kala ah '**k, kh, g, ng**'. Waxana la yidhaa **velars**.

Kolka ay carrabka guntiisu cadaadiso hilib-dalqaha waxa samaysma dhawaaqa '**q**' iyo '**Kh**'. Waxana la yidhaa **uvular**



Kolka uu carrabku riixo ama cadaadiyo qalaanqulshaha dabayshuna yar hakato waxa isna samaysma dhawaaqa '**C**'. Haddii aanay carrabka guntiisu taaban qalaanqulsha cod sida xabeebta oo kale lihina soobaxo waxa samaysma xarafka '**X**'. Waxana loo yaqaan **pharyngeals**.

Kolka ay carrabka caaradiisu kor u laabanto ee inta uu codku istaago haddana siideysmo waxa samaysmo



xarafka ‘dh’. Waxan loo yaqaan ‘retroflex’.

**Iimaha carrabka:** Iimaha carrabka waxa ka mid ah carrab la’aanta. Waana kolka uu uu qof si fiican ugu dhawaaqi kari-waayo dhawaaqyada afka uu ku hadlo. Qofka iintaasi leh waxa loo yaqaan carrablaw ama carrabey sida Salaan Carrabey.

Maahmaah Soomaaliyeed baa tidhaa: *Carrab dalab leh lug dalab leh laga garan og (ama laga arki og)*. Waxa hadda isweydiin leh sida uu carrabku dalab u yeelan karo? Ugu horrayn dalab wadartiisu waa dalbo. Badiyaana lugaha ayaa yeesha. Waana kolka ay labada jilib isa soo eegaan. Haddii aan si kale u idhaana ay isu soo dhowaadaan. Jilib qudhihi kolka uu dhinaca ka kale u janjeedhsama waa dalab. Haddaba carrabku dalba ayuu yeeshee inkasta oo aanu dhinac u leexan ama u qalloocsamin sida lugta. Waana kolka uu hadal qof lagu yidhi la dareemo in ujeedo gaar ah laga leeyahay oo aan hadalkaasi si daacad ah loo odhan. Maahmaahduna waxay tibaaxaysaa in hadalka qallooca laga arki ogyahay lugta dalabta leh. Halkan ujeeddadii erayga carrab waxay noqotay hadal.

Nin ilko dheeri hadduu go’ayna inuu qoslayaa la moodaa.

Carrab jalqo: Tanna waa ii kale oo carrabka ku dhacda oo qofka qaba uu hadalka si aan caadi ahayn uu ugu dhawaaqo.

### **Gabagabo:**

Guntii iyo gabagabadii, waxa innoo caddaatay in dadku dibnaha iyo carrabka u adeegsadaan hadalka, calalinta, cabbidda iyo waxyaalo badan oo aanay xooluhu adeegsan kuwooda. Taasina waa ta keentay inuu Eebbe innoogu mannasheegtay.

## **Raadraac**

Kitaabka Quraanka ee ujeeddadiisa loo haltebiyey af Soomaaliga

Kitaabka Quraanka ee ujeeddadiisa loo haltebiyey af Carabiga

Kitaabka Quraanka ee ujeeddadiisa loo haltebiyey af Ingiriiska  
Carabiga

Victoria Fromkin, Robert Rodman, Neil Hultin and Harry Logan. An  
Introduction to language, Harcourt Canada, Toronto, Canada, 2001.

Dale, Philip S. Language development, structure and function,  
University of Washington, Seattle, 2edition, 1976.

O'Grady, William, Dobrovolsky, Michael. Contemporary linguistic  
analysis: An introduction, University of Calgary, Copp Clark Pitman  
Ltd., Toronto, 1987.

[www.google.com](http://www.google.com)